



Adeegyada dadwaynaha ee guryaha Seattle (SPU) waxay si aad ah ugu dadaashaa in goobaheena dhismuhu ammaan u yihii shaqaalaha, shaqaalaha shaqada, iyo dadweynaha. Inta dhismuhu socdo, mashiinno cul culus, qalabyo, iyo alaabaha ayaa halis noqon kara. Sababtaas awgeed, waxaan kaa codsaneynaa inaad raacdo talooyinkan badbaadada.

## Talooyinka Guud

- Mar kasta oo ay suurtogal tahay, iska ilaali inaad u dhowaato aaga dhismaha.
- Raac dhammaan calaamadaha taraafikada iyo jihoyinka shaqaalaha shaqada iyo calankooda.
- Ka feejignow oo ka fogow waxyabaha carqladeeya markaad ku jirto ama ku dhowdahay aaga dhismaha.

## Darawal lada/Rakaabka

- Fadlan ha ku kaxayn baabuur goobta dhismaha. Wuxaad khatar u geesan kartaa inaad dhaawacdo naftaada iyo shaqaalaha dhismaha. Haddii ay tahay inaad baabuur ku dhex marto aagaga shaqada kasocoto si aad u gaarto guri ama meherad, fadlan si taxaddar ah u raac tilmaamaha shaqaalaha ee goobta.
- Markaad ka baxaysid waddadaada, gadaal iska hubi haddii hawlaho dhismaha ama qalabku in ay ku hortaagan yihii.
- Haddii jidkaaga ama dariiqaaga la xannibo, xusuusnow inaad baabuurkaaga u wareejiso meel ka baxsan goobta dhismaha ka socdo ka hor intaan shaqadu bilaaban.



## Dadka lugeenaya

- Tariib usoco oo raac calaamadaha kuu sheegaya meesha aad ku soconayso oo ay ka mid yahim kursiga curyaamiinta ama baaskiilka.
- Jooji, fiiri, oo dhegayso baabuurta dhismaha iyo mishiinada. Hubi in uu darawalku ku arko haddii ay kugu dhow yihii.
- Iska fiiri laamiga ama waddooyinka aan sinneen.

## Helitaanka

La xiriir maareeyaha mashruuca SPU si aad u ogeysiiso haddii aad leedahay baahiyoo gooni ah oo ku saabsan awooda gelitaanka.

*Fadlan ha u dhawaanin goobta qodista ama dhismaha si aad ula hadasho shaqaalaha dhismaha. Haddii aad ra'yi ama wax su'aalo ah oo ku saabsan amniga dhismaha aad qabtid, fadlan nagala soo xiriir lambarka/emaylka ku yaal ogeysiiska mashruuca ee aad heshay.*

*Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan soo booqo: [www.seattle.gov/utilities/constructionafety](http://www.seattle.gov/utilities/constructionafety)*

***Waad ku mahadsan tahay sida aad noogu caawisay inaan ka dhigno  
goobteenna dhismaha meel ammaan !***